Wajiga 1A Wuxuu bilowday 12-ka Diseembar, 2020

Qof kasta oo ku jira Wajiga 1A, Kooxaha 1,2,3 iyo 4 ayaa u-qalma tallaalka.

Kooxda 1

- Shaqaalaha isbitaalka ee leh mas'uuliyadaha daryeelka bukaanka
- Daryeelka degdegga ah
- Xirfadleyaasha xannaanada iyo shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee xarunta daryeelka xasuusta (HCP) iyo degganeyaasha
- Barnaamijyada caafimaad ee tuuleed
- Bixiyeyaasha adeegyada caafimaadka degdega ah (EMS) iyo shaqaalaha kale gurmadka
- Dhammaan turjubaanada daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha daryeelka caafimaad ee caadiga ah ee ka shaqeeya mid ka mid ah goobaha ku jira Wajiga 1a

Kooxda 2

- Xarumaha kale ee daryeelka muddada-dheer, oo ay ku jiraan dhammaan shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee xarunta daryeelka xasuusta (HCP) ee mushaarka qaata iyo kuwa aan mushaarka qaadan, dhammaan shaqaalaha iyo qandaraasleyaasha, oo ay ku jiraan degganayaasha buuxiya shuruudaha da'da:
  - » Xarumaha daryeelka guriga
  - » Xanaanada dadka waayeelka ah
  - » Hoyga kooxeed ee loogu talagalay dadka qaba curynaannimada caqliga iyo korriinka
  - » Goobaha kale daryeel ee la isugu imaado
- Barnaamijyada daryeelka guriyeed ee dadka liita
- Daryeelka wareega ee dhibaatooyinka iyo adeegyada la xiriira
- Shakhsiyaadka ka shaqeeya goob asluubeed
- Dadka muddakarka ah iyo dhallinyarta meel lagu hayo ee da'doodu tahay 16 iyo ka weyn

Kooxda 3

- HCP-yada ku jira goobaha bukaan-socodka ee u adeegaya kooxaha ku jira halista sare ee gaarka ah
- Adeegyada daaweyn ee maalinta
- Gaadiidka caafimaadka ee aan gurmadka ahayn (NEMT)
- Xannaaneeyeyaasha mushaarka qaata ama mushaarka aan qaadan (oo ay ku jiraan waalidka ama waalidka ilmaha korsada) ee carruurta ama dadka waaweyn caafimaad ahaan jilicsan ee ku nool guriga
- Qaangaarka iyo carruurta da' ahaan u-qalma ee leh xaalad caafimaad ama naafonimo ee ku hela adeegyada guryahooda

Kooxda 4

- Dhammaan HCP-yada kale ee bukaan-socodka
- HCP-yada kale ee adeegga tooska ah siiya dadka qaba I/DD iyo dadka kale ee halista sare ugu jira cudurka.
- Goobaha kale ee caafimaadka bulshada, sida HCP-yada u adeegaya WIC, ama CBO-yada leh u-baylah noqosho toos ah ama aan toos ahayn

Dadka u-qalma:
400,000 qiyaas ahaan

Wajiga 1B Wuxuu bilawday 25-ta Janaayo, 2021

Kooxyada 1–5

- Bixiyayaasha daryeelka carruurta, macallimiinta iyo shaqaalaha waxbarashada hore iyo dugsiyada K–12
- Dadka 65 jirka ah ama ka weyn

Kooxda 6

U qalmo wax aan ka dambeyn Maarso 29, 2021

- Dadka weyn ee jira 45–64 ee qaba hal ama ka ka badan xaaladaha caafimaadka daran iyohalista korodhay*
- Shaqaalaha soogalootiga iyo shaqaalaha xiliyeed ee beeraha
- Shaqaalaha cuntada badda iyo beeraha
- Shaqaalaha warshadeynta cuntada
- Dadka ku nool guriga waayeelka dakhliga hooseeyo, usu imaanshaha waayeelka iyo noolaanshaha madax banaan
- Shaqsiyaadka la kulmayo guri la'aanta (hoy leh ama aan hoy laheyn)
- Dadka dhawaan bara kiciyay dabka duurka
- Dab damiyayaasha dabka duurka
- Dadka uurka leh ee 16 jirka ah ama ka weyn

Kooxda 7

U qalmo wax aan ka dambeyn Abriil 5, 2021

- Shaqaalaha safka hore sida lagu qeexay CDC** iyo da'dooda xubnaha ee uqalma qoyska isla qoyska
- Shakhsiyaadka ku nool qoysaska leh jiilal kala duwan
  - » Qoysaska Jiilalka kala duwan macnaheedu waa qoys leh:
    - Dad ah jiilal seddex ama ka badan oo nool, sida guri qof da'a weyn oo la nool waalidiin uu dhalay iyo caruur uu awoowe/ayeeyo u yahay; ama
    - Shakhsi ama shakhsiyaad 50 oo la dagan oo ama daryeelaya qof qaraabo ah oo aan ahayn ilmahooda (tusaale ahan, ilmo awoowe/ayeeyo loo yahay, ilmo adeer/abti)
- Dadka weyn 16–44 ee qabo hal amaka weyn oo leh xaaldo caafimaad ee kale oo ku jira halis sii badan*

Macallimiinta:
152,000 qiyaas ahaan

Dadka ka weyn 65 jir:
765,000 qiyaas ahaan

Wajiga 2:

U qalma Abril 19, 2021

- Dadka oo dhan ee 16 jirka ah iyo ka weyn

Oregon Health Authority

OHA 3527A SOMALI (4/6/2021)

** Shaqaalaha safka hore waxaa ku jiro dadka ka shaqeeyo warshadahaan:

- Shaqaalaha safka hore waa qof haysto shaqo ee geliyaa shaqsiga halis sareyso oo qaadista COVID-19 sababtoo ah:
  - » U dhawaanshaha dhow ee joogtada ah ee dadka kale ee ka baxsan qoyskooda (wax ka yar lix fiit); iyo
  - » Joogto ah (wax ka badan 15 daqiiqo qofkiiba (dadkiiba))u dhawaanshaha dhow ee dadka kale ee ka baxsan qoyskooda; iyo
  - » Kuma sameyn karaan waajibaadyada shaqadooda guriga ama meel kale ee xadeyso u dhawaanshaha dhow ama joogtada ah ee dadka kale ee ka baxsan qoyskooda.

Kuwaan waxaa ku jiro†:

- Shaqaalaha soo saarayo tallaalka, iyo daawooyinka, qalabyada, saadadka, ama qalabka illaalada shaqsiga
- Cuntada kale iyo beeraha oo aan ku jirin Wajiga 1b, Kooxda 6, oo ay ku jiraan dhaqashada xoolaha, soosaarka sharaabka, xanaanooyinka, xarumaha beeraha, dukaamada tas'hiilaadka beeraha, adeegyada xoolaha, kaluumeysiga iyo ugaarsiga, keymaha
- Dukaannada bagaashka iyo dukaannada (kasta) tafaariiqda, oo ay ku jiraan suuqyada cuntada, farmashiiyada, dukaamada dhow, dharka tafaariiqda iyo dukaamada gaarka ah
- Kulliyadaha bulshadeed, kulliyadaha, jaamacadaha, dhaqan-celinta xirfadeed, dugsiyada ganacsiyeed iyo xirfadeed iyo adeegyada taageerada waxbarashada ee la xiriira, maamulka barnaamijyada waxbarashada
- Adeegga Boosto ee Mareykanka
- Gaadiidka dadweynaha, oo ay ku jiraan wadeyaasha basaska iyo tareenada aada miyiga, dugsiga iyo gaadiidka baska shaqaalaha, gaadiidka baahiyaha gaarka ah
- Soo saarida; oo ay ku jiraan alwaaxa, warqada, shidaalka, dhuxusha, laamiga, saqafeynta, kiimikada, caagaga, biraha, mashiinada warshada, kumbuyuutarada, korontooyinka, gaadiidka, armaajooyinka iyo iskafaalooyinka, qalabka caafimaadka, hagaajinta iyo dayactirka, adeegyada naqshadaha warshadaha
- Gaadiidka iyo saadka loogu talagalay warshad kasta oo ku jirta Wajiga 1b, oo ay ku jiraan hawada, tareenka, biyaha, looriga, taksiga, gaariga raaxada, baska la kireysto, gaadiidka kale iyo gaadiidka rakaabka ah ee mara dhulka, iskuul wiidooyinka, dukaanada jumladeed, bakhaarada, keydinta iyo bixinta adeegga, baakadeynta iyo calaamadeynta, ganacsatada baabuurta iyo qalabka gawaarida, dukaamaha elektarooniga iyo ganacsada qalabka, kireynta iyo ijaarka gaadiidka, iyo hagaajinta iyo dayactirka, adeegyada la xiriira
- Adeegga cuntada, oo ay ku jiraan adeegga makhaayadaha iyo baararka, ergada, adeegga cuntada bulsheed
- Tamarta, oo ay ku jiraan yutilitiyada, soo saarka saliida iyo gaaska, dhagax qodida, saldhigyada gaaska, ganacsatada shidaalka, booyadaha shidaalka, la-talinta deegaan
- Biyaha iyo qashinka biyaha, maareynta qashinka adag iyo dib u warshadeynta, oo ay ku jiraan yutilitiyada
- Guriyeynta, oo ay ku jiraan shaqaalaha dhismaha, qandaraasleyaasha, hantida ma guurtada ah, adeegyada guriyeynta ee bulshada, barnaamijyada guriyeynta ee la awoodi karo, hoyga socotada, hoyga ganacsiga, naqshadeynta gudaha guryaha, habka dhismaha, injineeriyada iyo adeegyada la xiriira.
- Tiknoolajiyada macluumaadka iyo wadaxiriirka, oo ay ku jiraan daabacaadda softiweerka, isgaarsiinta, farsameynta xogta, martigelinta mareegaha iyo adeegyada la xiriira, daabacaadda internet-ka iyo baahinta wararka iyo mareegaha raadinta bogeed, qaabeynta nidaamka kombuyuutareed iyo adeegyada la xiriira, hagaajinta iyo dayactirka qalabka elektarooniga
- Warbaahinta, oo ay ku jiraan kuwa wararka iyo daabacaadda
- Adeegyada xanaano maalmeedka ilmaha ee aan lagu darin Wajiga 1b, kooxaha 1-4, oo ay ku jiraan waxqabadyada duur-baxa iyo waxqabadyada dugsiga kadib.
- Caafimaadka dadweynaha, oo ay ku jiraan la-talinta saynis iyo farsamo, cilmi-baarista iyo horumarka, maamulka
- Daryeelka caafimaadka iyo adeegyada la xiriira ee aan ku jirin Wajiga 1a, oo ay ku jiraan adeegyada waayeelka iyo dadka naafada ah, adeegyada kale ee shakhsiyeed iyo qoyseed, guryaha aaska meydka iyo adeegyada aaska meydka, qabuuraha iyo goobaha gubista meydka
- Badqabka dadweynaha ee aan lagu darin Wajiga 1a, oo ay ku jiraan, injineeriyada madaniga ah, maareynta qashinka iyo adeegyada hagaajinta bay'adda, adeegyada aadanaha iyo adeegyada bulshada, sida adeegyada ilaalinta ilmaha
- Maaliyadda, oo ay ku jiraan bangiyada, dhexdhexaadinta amaaheed, xafiisyada amaahda, dammaanadaha, qandaraasyada badeecadaha, maalgashiga maaliyadeed iyo howlaha la xiriira, xisaabaadka, diyaarinta canshuuraha, adeegyada bixinta mushaaraadka, maamulka shirkadda,
- Sharciga, oo ay ku jiraan shaqaalaha maxkamadaha, garsooreyaasha, qareenada, warbaahinta maxkamadeed, siideyn sharafeedka iyo xafiisyada asluubeed
- Dowlada, oo ay ku jiraan shaqaalaha iyo qandaraasleyaasha qabanayo adeegyada ama ganacsiga dadweynaha, iyo saraakiisha la doortay, maktabadaha
- Sharci dajinta Gobolka Oregon iyo laanta fullinta sida ay qeexeen Waaxda Adeegyada Maamulka (DAS)
- Kale: Baaritaanka iyo adeegyada amniga, xadiiqooyinka iyo jardiinooyinka dhirta, jardiinooyinka dabiiciga ah iyo mac'hadyada la midka ah, goobaha maaweelada iyo madadaalada, hagaajinta iyo dayactirka qalabka, hagaajinta iyo dayactirka alaabta shaqsiyeed iyo guriyeed, daryeelka rabaayadda, adeegyada dhaqista iyo feereynta dharka, ururada diimeed, adeegyada guriyeed ee gaarka ah (tus., daryeelka ilmaha ee gudaha guriga, nadiifinta guriga, dayactirka guriga), maareynta barnaamijyada ilaalinta deegaanka

*Xaalada caafimaadka daran ee leh halista korodhay sida ay ku qeexeen Xarumaha Xakameynta iyo Ka hortaga Cudurka (CDC)

- Kansar
- Cudurka kelyaha daran
- Cudurrada sanbabka ee joogtada ah, oo ay ku jiraan COPD (cudur sanbabada oo xanniba), neefta (dhexdhexaad-ilaa-daran), cudur sambabaha oo kala-goys ah, cystic fibrosis, iyo dhiig-karka sambabaha
- Asaasaqa ama xaaladaha kale ee neerfaha
- Sokorowga (nooca 1 ama nooca 2)
- Curyaannimada Lagu dhasho
- Xaaladaha wadnaha, sida howlgabka wadnaha, cudurka halbowlaha wadnaha, ama cudurka murqaha wadnaha
- Infekshinka HIV
- Xaaladda Immunocompromised (habka difaaca jirka oo daciifa)
- Cudurka beerka
- Culeys xad dhaaf ah iyo cayilnaan (oo lagu qeexay culeyska jirka (BMI) oo ka weyn 25 kg / m2)
- Uurka
- Cudurka Sickle cell ama thalassaemia
- Sigaar cabid, mid hadda socda ama kii hore
- Xubinta adag ama xubinta taranka dhiiga
- Istaroog ama cudur maskaxda ku dhaca
- Dhibaatooyinka isticmaalka maandooriyaha

†Kani ma ahan liiska dhameystiran; ka fiiri https://www.cdc.gov/vaccines/covid-19/categories-essential-workers.html wixii liiska buuxo ah.

Helitaanka dokumintiga: Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacaada ballaaran, ama farta indhooleyaasha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us.

Oregon Health Authority

OHA 3527A SOMALI (4/6/2021)